

Ma ka walaacasantahay badbaadaada gaarka ah?

**Ma ahan in qof walba badbaado
ku fillan dareemo oo sharaxaado
si shaacsan looga heli karo
liiska doorashada, laakiin taasi
micnaheeda ma ahan inay lumiyaan
xaquuqda lagu codeynayo.**

Haddii aad ka walaacsantahay
badbaadada shaqsigaga, ama
mida qoyskaaga, waxaad codsan
kartaa inaad aadid liiska qarsoodiga
aan la daabicin. Sharaxaadaha
diiwaangelintaada waxaa lagu
haynayaa si badbaado ah oo aan la
siineyn qof walba.



vote.nz
0800 36 76 56

ROE47B 07/24 Somali

Ma ka walaacsantahay badbaadada shaqsigaga?



**ELECTORAL
COMMISSION**
TE KAITIAKI TAKE KÖWHIRI





Ka waran haddii sharaxaadaheyga shaqsiga isbadelaan?

Markii aad ku jirtid liiska aan la daabicin, waxaad u baahanaysaa inaad nasoo ogeysiisid haddii kuwa ka mid ah sharaxaadaaha diiwaangelintaada isbadesho, sida magacaaga ama cinwaanka. Waxaad sidaas ku sameyn kartaa buuxinta foomka diiwaangelinta cusub iyo inaad nagu soo celisid. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa inaad dib ugu laabatid liiska shaacsan ee la heli karo haddii xaaladahaaga shaqsiga ah isbadelaan.

La xiriir Guddiga Doorashooyinka ama iimeyl noogu soo dir **unpublished.roll@elections.govt.nz** haddii aad u baahantahay inaad ku sameysid wax ka beddelid.



Sidee ayaan u codeeyaa markii aan ku jiro liiska aan daabacneyn?

Waxaad ku codeyn kartaa meel kasta oo laga codeeyo ee doorashada guud ama doorasha ahan ah. Waxaad u baahanaysaa inaad cod bixin gaar ah bixisid sababtoo ah sharaxaadaahaaga kuma jireyso liiska doorashada daabacane loo isticmaalo in lagu ansixiyo waraaqaha codeynta ee goobta codeynta.

Waxaad u baahanaysaa inaad buuxisid foomka dheeraadka ah ee wehliyo waraaqahaaga codeynta si aad u xaqiijisid doorashada halka aad ka diiwaangashantahay inaad ku codeysid. Waxaad u baahantahay inaad dhameystirtid warbixinta ciwaanka ama magaca hore ee foomka ku yaalo haddii aadan rabin inaad. Si kastaba, bixinta warbixintaan waxay nagu caawineysaa inaan xaqiijino u qalmidaada codeynta. Goorta aad heshid meesha doorashada, qof ayaa halkaas u joogayo inuu ku tusiiyo waxa la sameeyo.

Si aad u codeysid doorashooyinka deegaanka, waxaad u baahanaysaa inaad weydiiso sarkaalkaaga cod bixinta ee gollaha deegaankaaga inay kuu soo diraan waraaqaha codeynta.



Sida loo aado liiska aan daabacneyn

Si aad u codsatid aadista liiska aan daabacneyn, dhameystir foomka ku lifaaqan qoraalkaan oo inaga nagu soo celi:

Haddii aadan horaan i diiwaangashaneyn, ama aad u baahantahay inaad cusbooneysiiso sharaxaadaahaaga, waxaad sidoo kale u baahanaysaa inaad dhameystirtid foomka diiwaangelinta. Si aad u heshid foomka diiwaangelinta, ka dooro mid ka mid ah labadaan iqtiyaar:

- soo wac **0800 36 76 56** oo waxaan kuu soo dhigeynaa foomka diiwaangelinta
- ka dajiso foomka diiwaangelinta **vote.nz** si loo dhameystiro oo loogu soo celiyo inaga.



Warbixintee taageereyso ayaan u baahannahay inaan ku daro?

Waxaad u baahantahay inaad bixisid warbixinta muujineyso sababta aad ugu baahantahay inaad iska diiwaangelisid liiska aan daabacneyn. Halkaan waa tusaalooyinka qaar ee nooca warbixinta lagu darayo. (Uma baahnid in noocyadaan oo dhan oo warbixin ah si aad u codsatid.)

- **Warqad sharaxeyso sababta shaqadaada ama xaaladahaaga shaqsiga aad halis u geliso.** Warqadaan waxay ka imaan kartaa badroonigaaga, qareenka, shaqaalaha bulshada, u doode, ama qof taagan bulshada.
- **Nuqulka amarka illaalada oo ku dhaqan galay sida waafaqsan Xeerka Rabshada Qoyska 2018.**
- **Nuqulka amarka xanibaada oo ku dhaqan galay sida waafaqsan Xeerka Dhibaateynta 1997.**
- **Warbixinta ka imaaneyso sarkaalka booliska ama saraakiisha xabsiga oo sharaxeyso sababta daabicida magacaaga iyo ciwaanka ay halis u gelin karto adiga ama qoyskaaga.**

Complete this form to apply to go on the unpublished roll.

Full name:

Date of birth:

Contact phone number:

Email:

Address where you are enrolled to vote or have applied to enrol:

List the information provided to support your application:

Please tick one of the following:

I am already enrolled to vote

I am not enrolled and I have enclosed a completed enrolment form

Signature

Date

Complete and return to Electoral Commission,
PO BOX 190, Wellington 6140

Remember to return any information that supports your application to register on the unpublished roll.

For more information visit **vote.nz**



ELECTORAL COMMISSION
TE KAITIAKI TAKE KŌWHIRI